## Saxiixayaasha 'Roap Map' ka, 2012

# Borotokoolka lagu Aasaasayo Guddiga Farsamo ee Xulitaanka

**Waxaa laysla qaatay June 22, 2012**

Saxiixayaasha 'Road Map'ku, iyagoo u heelan in ay fududeeyaan sidii loo hirgelin lahaa heshiisyadoodii hore ee lagu gaaray Kampala, Muqdisho, Garoowe, Gaalkacayo iyo Addis Ababa, isla markaana meel marinaya tilmaamihii ku caddaa Digreetaddii Madaxweynaha ee [**Geli Taariikhda**], waxay halkan iskula qaateen Borotokoolka soo socd si ay u aasaasaan Guddiga Farsamo ee Dib-u-Eegista ee Saxiixayaasha ee Digreetadaa lagu xusayo.

## QODDOBKA 1

### Qeexid

1. Borotokoolkan gudihiisa – ereyada "Saxiixayaasha 'Roadmap'ka Soomaaliyeed' waxaa loola jeedaa madaxda jagooyinkan haya, hawlgalkooda wadareed:
   (i) Madaxweynaha Dawladda Ku Meela Gaarka ee Federaalka ah;
   (ii) Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka ee Ku Meel Gaarka ah;
   (iii) Raysal Wasaaraha Dawladda Federaalka ee Ku Meel Gaarka ah;
   (iv) Madaxweynaha Puntland;
   (v) Madaxweynaha Galmudug; iyo
   (vi) Wakiilka Ahlu Sunna Wal Jamaaca:
   (vii) Wakiilka Gaarka ah ee Xooghayaha Guud ee Qaramada Midoobay

2. Borotokoolkan waa in loo macneystaa loona dabaqaa si waafaqsan, isla markaana si buuxda u taageereysa, heshiisyaddii ay ku gaareen Saxiixayaasha 'Road Map'ka Heshiiskaa Kampala, 'Road Map' ka, Heshiisyaddii Garowe I iyo II, Heshiiskii Addis Ababa, iyo Digreetaddii Madaxweynaha ee tariikhdeedu ahayd **[Geli Taariikh]**

3. Wixii khilaaf ah ee ka yimaadda macnaha/qeexidda ama meel marinta Borotokoolkan waxaa loo celinayaa Saxiixayaash 'Road Map'ka sida uu dhigayaan Heshiisyada lagu xusay qoddobka (2), si arrintaa xal loogu raadsho tilmaamo iyo talooyina loogu helo.

4. Dawladda Ku Meel Gaarka Federaalka ah iyo Beesha Caalamka waxaa laga codsanayaa in ay bixiyaan wixii taageero dhinacyada maamulka iyo dhaqaalaha ah ee loogu baahdo in lagu badhi taro gudashada waajibaadka Guddiga Farsamo ee Dib-u-Eegista.

## QODDOBKA 2

### Asaaska Guddiga Farsamo ee Xulitaanka

1. Borotokoolkan waxaa lagu asaasayaa Guddi Farsamo oo Xulitaan oo ka kooban 27 xubnood oo Soomaali ah oo cod leh iyo laba xubnood oo aan cod lahayn oo ka socda 'UNPOS' oo u dhisan sidan:

a) Lix wakiil oo ka imanaya mid walba oo ka mid ah afarta beelood ee waaweyn iyo saddex wakiil oo ka socda beesha 5aad, taasoo ka tarjumeysa. Ugu yaraan lab aka mid wakiilada ay soo xuleen afarta beelood oo waaweyn iyo ugu yaraan hal xubin oo ka tirsan wakiilada beesha shanaad waa in ay noqdaan haween, taasoo ka tarjumeysa Heshiiskii Kampala, 'Roadmap'ka Soomaaliya, Garowe I iyo II, Heshiiskii Gaalkacayo, iyo Heshiiskii Addis Ababa.

b) Laba qof oo ka socda xafiiska siyaasadda Qaramada Midoobay (UNPOS), oo midkood loo baahan yahay in uu noqdo haween, oo ku shaqaynaya nidaam iyagoo aan cod lahayn, kuwaasoo bixinaya taageero iyo talo dhinaca farsamada ah.

2. Xubnaha Guddiga Farsamo ee Xulitaanka waxaa taageeraya toddoba goob jooge oo ka socda Beesha Caalamka.

3. Xubnaha Guddiga Farsamo ee Xulitaanka, marka laga reebo xubnaha aan codka lahayn iyo kuwa goob joogayaasha ah, waxaa magcaabaya Saxiixayaasha 'Roadmap'ka Soomaaliyeed XX maalmood gudahood marka la saxiixo Borotokoolkan.

4. Xubin walba oo ka tirsan , mrka laga reebo kuwa aan codka lahayn iyo goobjoogayaasha ee lagu xusay qoddobka (1) (b) iyo (2), waa in :

   (a) Ay noqotaa wuwaadiniin Soomaaliyeed;
   (b) Da' ahaan ay noqotaa ugu yaraan 21 sanno;
   (c) Ay leedahay waxbarasho ugu yaraan heer Dugsi Sare ah;
   (d) Ay leedahay waaya aragnimo dhinaca doorashooyinka ama shaqooyinka u dhow;
   (e) Ay ku leedahay mujtamaca dhexdiisa magic iyo sharaf wanaagsan; laguna tixgeliyaa xubintaa daacadnimadeeda, waddaniyad iyo dulqaad una taagan xushmeynta xuquuqda dadka Soomaaliyeed oo dhan;
   (f) Aanay lahayn hami siyaasadeed oo waqtigan la joogo xubintaasi daboolka ka qaaday, ama aanay lahayn dano khilaafsan hawsha guddigan, shakhsi ahaan iyo qoys ahaan.
   (g) Aanay lahayn xubintaasi taariikh ama raad tilmaamaya in ay geysatay denbiyo culus ama denbiyo ka dhan ah aadaminimada.

## QODDOBKA 3

## Waajibaadka Guddiga Farsamo ee Xulitaanka

1. Guddiga Farrsamo ee Xulitaanka waa in uu diwaan geliyaa isla markaana faafiya oo daabacaa liiska 135 Hoggaamiye Dhaqameed ee la aqoonsan yahay ee gacanta ku qabanaya xulitaanka xubnaha Golaha Ansixinta Dastuurka iyo Baarlamaanka Federaalka ee cusub si waafaqsan nidaamka iyo shuruucda arrintan khuseeya.

2. Guddigu wuxuu yeelanayaa xilalkan iyo shaqooyinkan mucayinka ah:

   (a) In ay sammeyaan qiimeyn ku saleysan shuruudo mawduuci ah sida ay dhigayaan Heshiiskii Kampala, 'Roadmap'ka Soomaalida, Heshiisyaddii Garowe I iyo II, Heshiiskii Gaalkacayo, iyo Heshiiskii Addis Ababa, qiimeyntaasoo lagu sameynayo dhammaan dadka loo soo magcaabo Golaha Ansixinta Dastuurka iyo Barlamaanka Federaalka ah ee Cusub, markaa ka

dibna in ay Guddidu dib ugu gudbiso magacyada murashaxiinta Hoggaamiye Dhaqamedyada si loo soo gabagabeeyo hawsha magcowga rasmiga ah ee kama danbeysta ah.

(b) In ay go'aan ka qaataan xeer iyo nidaamka lagu soo xulayo laguna dooranayo murashixiinta ee ay kaga mid noqonayaan Golaha Ansixinta Dastuurka iyo Baarlamaanka Federaalka ah ee cusub.

(c) In ay sameeyaan wacyi gelin dadweyne oo la xiriirta habka loo soo magcaabayo loona dooranayo murashaxiinta ka midka noqonaya Golaha Ansixinta Dastuurka, iyo Baarlamaanka Federaalka ah ee cusub.

(d) In ay dhiirigeliyaan in habka murashixiinta loogu soo magcaabayaa xubinimada Golaha Ansixinta Dastuurka iyo xubnaha Baarlamaanka Federaalka ah ee cusub uu yahay mid cad oo la arki karo iyadoo Guddidu adeegsaneysa ogeysiisyo dadweyne, iyo ku soo bandhigidda qalabka warbaahinta magacyada murashixiinta la soo magcaabo.

(e) In Guddidu siiso taageero kale oo farsamo iyo mid maamulba hadba sida loogu baahdo, si loo sahlo aasaaska iyo xulitaanka Golaha Ansixinta Dastuurka iyo Baarlamaanka Federaalka ah ee cusub, iyadoo la raacayo qoddobada lagu soo saaray Heshiiskii Kampala, 'Roadmap'ka Soomaaliya, Heshiisyaddii Garowe I iyo II, Heshiiskii Gaalkacayo, iyo Heshiiskii Addisa Ababa;

(f) In ay hubiyaan in la fuliyay qoddobada la xiriira qaybaha uu ku saleysan yahay magcowgu ee khuseeya haweenka, qaacidada 4.5, iyo in laga qayb geliyo mujtamaca qaybihiisa oo dhan marka la aasaasayo Golaha Ansixinta Dastuurka Baarlamaanka Federaalka ee Cusub, si waafaqsan mabaadii'da lagu xusay faqradda €;

(g) In ay qabtaan hawlaha kale ee ay ka codsadaan Hoggaamiyayaasha Dhaqameed si loo sugo in Golaha Ansixinta Dastuurka iyo Baarlamaanka Federaalka ah ee cusub loo magcaabo si dadka oo dhan u cad oo lagu kalsoonaan karo.

3. Si meesha mugdiga looga saaro, iyadoo la raacayo mabaadii'da lagu xusay qoddobka 2(a), Borotokookani wuxuu carrabka ku adkeynayaa in Guddida Farsamo ee xulitaanku **aanay** ka masuul ahayn, wax awoodana ku lahayn, magcaabidda iyo soo xulitaanka Golaha Ansixinta Dastuurka iyo Baarlamaanka Federaalka ah ee cusub midna.

## QODDOBKA 4

### Habraaca Guddida Farsamo ee Xulitaanka

1. Marka ugu horreysa ee suuragal ah, marka la magcaabo Guddida Farsamo ee Xulitaanku waa in ay –

a) Dhexdooda ka doortaan laba Guddoomiya (isla guddoomiye), midkoodna waa in ay noqotaa haweenay;

b) Ay dhexdooda isu qaybiyaan saddex kooxood oo mid waliba ka kooban yahay ugu yaraan sagaal; ugu yaraan hal wakiil oo ka socda mid walba oo ka mid ah Saxiixayaasha 'Roadmap'kuna waa in ay joogaan marka kooxi go'aan ka gaareyso talo loo soo jeediyay fadhiga loo dhan yahay (panel) ee Guddiga Farsamo ee Xulitaanka;

c) Guddiga Farsamo ee Xulitaanku waxaa shir loo qaban karaa marka ugu yaraan 14 xubnood oo kuwa codka leh ah ay joogaan waqtigii iyo meeshii lagu cayimay ogeysiis shirkaa la xiriira;

d) Go'aamada Guddiga Farsamo ee Xulitaanka waxaa gaari kara tiro ka badan kala bar xubnaha codka leh ee jooga shirka;

e) Guddomiyaha shirka hoggaaminayaa wuxuu ka dhiiban karaa codkiisa arrin walba oo cod loo qaado, haseyeeshee ma dhiiban karo cod labaad oo kala saar labada dhinac ah;

f) Guddiga Farsamo ee Xulitaanku waa in uu diiwaan geliyaa qoraal la xiriira sida ay u dhaceen shirarkiisa iyo hawlihii lagu soo qaaday.

g) Guddiga Farsamo ee Xulitaanku wey u furi kartaa shirarkiisa goob joogayaasha kale, oo ay ka midka yihiin Bulshada Rayidka ah ee Soomaaliyeed iyo ururada haweenka marka ay doonaan.

## QODDOBKA 5

## Hab-dhaqanka xubnaha Guddiga Farsamo ee Xulitaanka

1. Qofkii loo magcaabo ama loo igmado in uu la shaqeeyo Guddiga Farsamo ee Xulitaanku sida uu dhigayo Qoddobka 1 iyo 2 waa in aanu isku dayin in uu ka mid noqdo Golaha Ansixinta Dastuurka ama Baarlamaanka Federaalka ee cusub, marka uu xilkiisa gudanayona waa in aanu/aanay –

(a). Faraha la gelin wax hawl ah oo wax u dhimi kart sharafta Guddiga Farsamo ee Xulitaanka;

(b). Ka qayb qaadan wax kulan ah, baaritaan, dhegeysi, ama go'aan la xiriira arrin uu qofkaasi ka leeyahay dan shakhsi ah;

(c). U adeegsan si shakhsi ah, ama uga faa'iidin, xog sir ah, xogtaasoo uu/ay ku ogaatay intii xubintaasi ku guda jirtay gudashada waajibkeeda rasmiga ee la xiriira xubinimada Guddiga Farsamo ee Xulitaanka; ama

(d). Aanu u gudbin wax xog ah sida lagu xusay faqradda (c) qof saddexaad, marka laga reebo wixii ay keento baahida loo qabo in qofkaasi guto xilkiisa rasmiga ah inta uu hayo hawsha Guddiga Farsamo ee Xulitaanka.

2. Haddii, ay mar uun dhacdo in ay ula muuqato xubin Guddigan Farsamo ee Xulitaanka ka tirsan in arrin lagu soo qaaday shir ay la xiriirto danaha shakhsiga ah ee xubintaa, xubintaasi waa in ay xubintaasi–

   (a). Isla markiiba si buuxda ugu sheegtaa shirka nooc ay dantaasi tahay; isla markaana

(b). xubintaasi ka baxdaa shirkaa si ay ugu oggolaato xubnaha kale in ay sii wadaatn falanqeynta arrinta iyo sidii ay go'aan uga gaari lahaayeen in xubinta laga mamnuuco wixii kulamo ah ee danbe ee arrintaa la xiriira iyo in kale.

3. Sheegitaanka xubintaa sida ku xusan qoddobka sare ee (2)(a), iyo go'aanka Guddiga Farsamo ee sida ku xusan qoddobka (2) (b), waa in markaba lagu diiwaan geliyaa xog qaadista shirka laga hadlayo.
4. Socodka shirka ee Guddiga Farsamo ee Xulitaanka iyo wixii go'aan ah ee ay isku raacaan aqlabiyadda Guddigu waa meel mar xataa haddii ay dhacdo –

(a) In gadaal laga ogaado in xubin guddiga ihi ay si aan kas ahayn ay uga hoos baxdo in ay sheegto danaheeda sida ku cad qoddobka (2); ama

(b) Gadaal laga ogaado in xubinta lagu sifeeyay qoddobka (a), ee danahaa lahayd ay shirarka ka soo qayb geleysay amaba si toos ah ama dadban ay shirarkaa go'aamadooda saameyn ugu lahayd.

5. Marka lagu guda jiro fulinta hawaajibaadka Gudiga, xubin waliba waa in ay ula dhaqantaa xubnaha kale ama xubnaha Hoggaamiye Dhaqamada si –
(a). Ay ku jirto niyad samaan ujeeddo wax dhisid ah;
(b). Hab u adeegaya fu;linta wanaagsan ee waajibaadka Guddiga Farsamo ee Xulitaanka; iyo
(c). Si waafaqsan mabaadii'da ku xusan qoddobka (3) (e), iyo wixii tilmaamo iyo xeer ah ee ay u soo dhigaan Saxeexayaasha 'Road Map'ka Soomaaliyeed Guddiga Farsamo ee Xulitaanka .

## Qoddobka 6

Habraaca Dib u Eegista ee Guddiga Farsamo ee Xulitaanka

1. Guddi ama koox walba oo ka tirsan Guddiga Farsamo ee waa in ay ku sameysaa qiimeyn hore oo la xiriirta saddex meelood oo meel dtirada dadka loo soo gudbiyay murashaxnimada, ka dibna waa in ay ku soo taaliyaan in xubin waliba ay –
   (a). fulisay shuruudihii mawduuciga ahaa ee xulitaanka ee loo dhigay xubnaha Guddiga Ansixinta Dastuurka iyo Baarlamaanka Federaalka ee cusub hab waafaqsan hay'adaha kala duwan ee loo magcaabi doonaa; ama
   (b). Aanay fulin Karin shuruudihii mawduuciga ee loo dhigay in lagu soo xulo Golaha Ansixinta Dastuurka iyo Baarlamaanka Federaalka ee cusub.

2. Haddii kooxaha Guddiga midkood ku sooo taliso in aanay xubini buuxin Karin shuruudaha mawduuciga ah ee xulitaanka, magcowgaa waxaa iayguna eegaya kooxaha kale midkood, kuwaasoo –

(a). Mar kale ku celinaya taladdii hore ee ahayd in xubintaasi aanay fulin Karin shuruuddii mawduuciga ahayd ee xulitaanka; ama

(b) Ku soo talinaya in xubintaasi ay fulin karto shuruudda mawduuciga ah ee fulitaanka

3. Guddiga Farsano ee Xulitaanku fadhigooda guud (plenary) waxay –

    a. Waxay si kama danbeysa u go'aansanayaan in murashixiintu ay fulin karaan ama aanay fulin Karin shuruudihii xulitaanka ka dib marka ay eegaan talada kooxda ama kooxaha;
    b. Waxay ku wargelinayaan Hoggaamiye Dhaqameedyada go'aamadaa ay gaareen; waxayna
    c. Faafinayaan magacyada dadka la soo magcaabay ee ka bixi kara shuruudahaa xulitaanka.

4. Liiskii ku guuldareysta in uu buuxiyo shuruudaha ay ka mid yihiin shuruudda magcowga ugu yaraan 30% haween ahwaa in la diidaa dibna loogu celiyaa Hoggaamiye Dhaqameedyadda si ay dib ugu soo habeeyaan iyagoo raacaya nidaamka dhigan.

Saxiixayada:

1. Mudane Sheekh Shariif Sh. Axmed
   Madaxweynaha Dawladda Federaalka ku Meel Gaarka ah
   Dawladda Federaalka Ku Meel Gaarka ah

   ______________________

2. Mudane Shariif Xasan Sh. Aden
   Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka ku Meel Gaarka ah
   Baarlamaanka Federaalka ku Meel Gaarka ah

   ______________________

3. Mudane Cabdiweli Maxamed Cali
   Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda Federaalka ku Meel Gaarka ah
   Dawladda Federaalka ku Meelka ku Meel Garka ah

   ______________________

4. Dr. Cabdiraxmaan Sheekh Maxamed Maxamuud
   Madaxweynaha Puntland
   Puntland

   ______________________

5. Mudane Maxamed Axmed Caalim
   Madaxweynaha Galmudug
   Galmudug

   ______________________

6. Sheekh Maxamed Maxamuud Yuusuf
   Wakiilka Ahlu Sunna Wal Jamaaca
   Ahlu-Sunna Wal Jamaaca

   ______________________

7. Dr. Augustine Mahiga
   Wakiilka Gaarka ah ee
   Xoghayah Guud ee QM ee Soomaaliy

   ______________________

# Somali Roadmap Signatories, 2012

## Protocol Establishing
## the
## Technical Selection Committee

**Adopted June 22, 2012**

The Somali Roadmap Signatories, committed to facilitating the implementation of their previous agreements adopted at *Kampala, Mogadishu, Garowe*, *Galka'yo* and *Addis Ababa,* and carrying out the directions given by Decree of the President on June 22, 2012, hereby adopt the following Protocol to establish the Technical Selection Committee referred to in that Decree.

## Article 1

### Establishment

1. This Protocol establishes the Technical Selection Committee.

## ARTICLE 2

### Establishment of the Technical Selection Committee

1. There is established a Technical Selection Committee consisting of 27 Somali voting members plus 2 non-voting members from UNPOS comprising:

(a) Six representatives from each of the four main clans and three representatives from the 5th clan reflecting the 4.5 formula. At least two of the representatives selected by each of the four main clans and at least one of the representatives selected by the 5th clan must be women, reflecting the *Kampala Accord,* the *Somali Roadmap*, the *Garowe I & II Principles*, the *Galka'yo Agreement*, and the *Addis Ababa Communiqué*; and

(b) Two persons from the UN Political Office for Somalia (UNPOS), one of whom must be a woman, serving as non-voting members who shall provide technical advice and support.

2. The members of the Technical Selection Committee shall be assisted by 7 observers from the international community.

3. The members of the Technical Selection Committee, except the non-voting and observer members, shall be appointed by the Somali Roadmap Signatories immediately upon signing this Protocol.

4. Each member of the Technical Selection Committee, except the non-voting and observer members referred to in clause (1) (b) and (2), shall—
    - (a) Be a Somali citizen;
    - (b) Be at least 21 years old;
    - (c) Have at least a secondary education;
    - (d) Have experience in elections or related fields;
    - (e) Be of good standing and repute in Somali society, as an honest, patriotic, and tolerant citizen who upholds the rights of all Somalis;
    - (f) Have no immediate declared personal political ambitions, or conflict of interest within the process of a personal or familial nature;
    - (g) Have no known history or record of committing serious crimes or crimes against humanity.

## ARTICLE 3

### Functions of the Technical Selection Committee

1. The Technical Selection Committee shall document and publicize the list of 135 recognized Traditional Leaders who will be engaged in selecting members to the National Constituent Assembly and the new Federal Parliament in accordance with the relevant procedures.

2. The Committee shall have the following particular responsibilities and functions:

   (a) Evaluate against objective criteria as stipulated under the *Kampala Accord*, the *Somali Roadmap*, the *Garowe I & II Principles*, the *Galka'yo Agreement*, and the *Addis Ababa Communiqué*, all nominees for appointment to the National Constituent Assembly and to the new Federal Parliament, and submit the names of the candidates back to the Traditional Leaders for final consideration for appointment;
   (b) Determine rules for the processes for nominating and selecting candidates for appointment to the National Constituent Assembly, and to the new Federal Parliament;
   (c) Promote public awareness of the processes for nominating and selecting candidates for appointment to the National Constituent Assembly, and to the new Federal Parliament;
   (d) Promote full transparency in the process of nomination of candidates for the National Constituent Assembly and the new Federal Parliament, through public notices, publication of names of nominees in the media;
   (e) Provide other technical and administrative assistance as necessary to facilitate the establishment and selection of the National Constituent Assembly and the new Federal Parliament, in accordance with the principles set forth in the *Kampala Accord*, the *Somali Roadmap*, the *Garowe I & II Principles*, the *Galka'yo Agreement*, and the *Addis Ababa Communiqué;*
   (f) Ensure compliance with the composition rules concerning women quota, the 4.5 formula and the involvement of the cross section of society in the establishment and membership of the National Constituent Assembly and the new Federal Parliament, in accordance with the principles referred to in paragraph (e);
   (g) Undertake other tasks requested of it byThe Traditional Leaders to ensure that the National Constituent Assembly and new Federal Parliament are established in a transparent and credible manner.

3. For greater certainty, following the principles referred to in clause 2 (e), this Protocol confirms that the Technical Selection Committee shall not be responsible, and does not have authority, to select or appoint the members of the National Constituent Assembly, or the new Federal Parliament.

## ARTICLE 4

### Procedures of the Technical Selection Committee

1. As soon as practicable after being appointed, the members of the Technical Selection Committee shall—
   (a) Select from among themselves two co-chairs, one of whom shall be a woman; and
   (b) Organize themselves into 3 panels of at least 9 members each; at least one representative of each of the Somali Roadmap Signatories must be present for a panel to decide on a recommendation to the Technical Selection Committee in plenary;
   (c) The Technical Selection Committee is properly convened if at least 14 of its voting members are present at the time and place specified in a notice for a meeting;
   (d) Decisions of the Technical Selection Committee shall be taken by more than half of the voting members present;
   (e) The presiding Chair may cast a deliberative vote on any matter, but may not cast a second, tie-breaking vote;
   (f) The Technical Selection Committee shall keep a written record of the business conducted at its meetings;
   (g) The Technical Selection Committee may declare its meetings open for other observers, including the Somali Civil Society and women groups at any time.

## ARTICLE 5

### Code of Conduct for members of the Technical Selection Committee

1. A person appointed or seconded to assist the Technical Selection Committee under Articles 1 and 2 shall not seek to be a member of either the National Constituent Assembly or the new Federal Parliament and, in the performance of his or her functions, shall not —
   (a) Engage in any activity that may undermine the integrity of the Technical Selection Committee;
   (b) Participate in any meeting, investigation, hearing, or decision concerning a matter in respect of which that person has a personal interest;
   (c) Make private use of, or profit from, any confidential information obtained as a result of performing that person's official functions on behalf of the Technical Selection Committee; or
   (d) Divulge any information referred to in paragraph (c) to any third party, except as required as part of that person's official functions within the Technical Selection Committee.

2. If, at any time, it appears to a member of the Technical Selection Committee that a matter being considered at a meeting concerns a personal interest of that member that member shall —
   (a) Immediately and fully disclose the nature of that interest to the meeting; and
   (b) Recuse himself/herself from the meeting to allow the remaining members to discuss the matter and determine whether the member should be prohibited from participating in any further proceedings concerning that matter.

3. The disclosure by a person in accordance with clause (2)(a), and the decision by the Technical Selection Committee in accordance with clause (2)(b), must be expressly recorded in the minutes of the meeting in question.

4. Proceedings of the Technical Selection Committee, and any decisions taken by a majority of the members present and entitled to participate in those decisions, are valid despite the fact that—

   (a) It is subsequently discovered that a member unknowingly failed to disclose an interest as required by clause (2); or
   (b) It is subsequently discovered that such a member described under (a), who had such an interest attended those proceedings, participated in them in any way, or directly or indirectly influenced those proceedings.

5. In carrying out the functions of the Committee, each member shall engage with the other members, and with the members of the Traditional Leaders, in—
   (a) A spirit of constructive good will;
   (b) A manner required to efficiently and effectively fulfill the Technical Selection Committee's mandate; and
   (c) Accordance with the principles referred to in clause (3)(e), and any further directions or rules prescribed for the Technical Selection Committee by the Somali Roadmap Signatories.

**ARTICLE 6**

**Procedures for Review of Nominees by the Technical Selection Committee**

1. Each panel of the Technical Selection Committee shall conduct an initial evaluation of one third of the nominees presented for consideration, and shall recommend that each nominee either—
   (a) Meets the objective selection criteria set out for members of the National Constituent Assembly and the new Federal Parliament in the protocol relevant to the respective institutions to which the nominees shall be appointed to; or
   (b) Does not meet the objective selection criteria set out for members of the National Constituent Assembly or the new Federal Parliament.

2. If a panel recommends that any nominee does not meet the objective selection criteria, that nomination shall be re-considered by one of the other panels, which shall either—
   (a) Affirm the original recommendation that the candidate does not meet the objective selection criteria; or
   (b) Recommend that the nominee meets the objective selection criteria.

3. The Technical Selection Committee in plenary shall—
   (a) Make the final determination whether a candidate does or does not meet the objective selection criteria after considering the recommendation of the panel or panels;
   (b) Advise the Traditional Leaders accordingly; and
   (c) Publish the names of nominees meeting the objective selection criteria.

4. Any list determined to not meet the criteria including the requirement of at least 30% women nominees must be rejected and sent back to the Traditional Leaders to re-submit according to established rules.

Signatories:

1. Transitional Federal Government
   President of the Transitional Federal Government
   Hon. Sheikh Sharif Sheikh Ahmed

   ______________________

2. Transitional Federal Parliament
   Speaker of the Transitional Federal Parliament
   H.E Sharif Hassan Sheikh Aden

   ______________________

3. Transitional Federal Government
   Prime Minister of the Transitional Federal Government
   H.E Dr. Abdiweli Mohamed Ali

   ______________________

4. Puntland
   President of Puntland
   Dr. Abdirahman Sheikh Mohamed Mohamud

   ______________________

5. Galmudug
   President of Galmudug
   Mohamed Ahmed Aalim

   ______________________

6. Ahlu-Sunna Wal Jamaaca
   Representative of Ahlu Sunna Wal Jamaaca
   Sheikh Mohamed Mohamud Yusuf

   ______________________

7. Special Representative of the
   Secretary General of the UN Somalia
   Dr. Augustine Mahiga

   ______________________